

## Beerta/barxada Murnalung waxay noqon doontaa goob madadaalo




### 'Murnalung' waa magaca beerta cusub ee laga hirgelinayo Flemington.

Waxaa la filayaa in la furo sanadka dhexdiisa, waa barxad weyn oo ku fadhisa dhul ka weyn 5,000 sqm oo doog cagaaran ah looguna talagalay bulshada.

Barxada Murnalung waxaa magaca loo bixiyay lala kaashaday duqooshinka Wurundjeri Woi-wurrung micnaha magacaasna waa 'shinni', maadaama beerta ay noqon doonto xarun hawleed iyo meel dhexe oo ay isugu yimaadaan dadka deegaanka iyo bulshada.


Barxada Murnalung waxay noqon doontaa meel cows iyo dhir/geedo leh, beero, meel weyn oo ay caruurto ku ciyaaraan, rug jimicsi iyo meelo la fadhiisto, iyo miisaska cuntada oo ay bulshada oo dhami ku raaxaysan karaan.

### Nagu xirnoow



Si aad wax kasta ula socoto booqo:

[homes.vic.gov.au/flemington-precinct](https://homes.vic.gov.au/flemington-precinct)



nagala socio baraha bulshada raadi  
**Homes Victoria**

### Maxaa ka socda Flemington

#### 126 Racecourse Road

- Waxaa wali sii socda howlihii mukeyf rakibida ahaa
- Rinjiyeynta jaranjarooyinka iyo meelo si ammaan ah loogu soo degi karo oo aan lagu simbirixanayn (ayaa sidoo kale ka socota 130 Racecourse Road)

#### Barxad cusub oo laga dhisayo Holland Court

- Shaqada la qabanayo maalmaha Sabtida iyo Axada waxay bilaaban doonaan 7subaxii waxaana la dhameyn doonaa 5Casarkii

#### Korontada iyo isku xirka biyaha ee mustaqbalka

- In la helo/ogaado adeegyada hada jira iyo in sidoo kalena la xiro adeegyo cusub oo dhulka hoostiisa ah
- In meesha laga saaro oo meelo kale loo raro nalalka kor ku rakiban
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto qalabka wax lagu qodo iyo waxyaabo la jarjaryo iyo sidoo kale gawaari culus
- Waxaa jiri doona isbeddello lagu samayn doono waddooyinka, meelaha laga soo galo baarkinada baabuurta iyo waddooyinka lagu lugeeyo
- Baarkinnada baabuurta ee la geli karo ee ku yaal 130 Racecourse Road waxay u guuri doonaan baarkinka baabuurta ee dhanka Bari
- Jidgooyooyin ayaa jiri doona aaggana si fiican ayaa loo iftiimin doonaa si ammaankaaga loo sugo
- Calaamado ayaa laga samayn doon goobta si ay kuu geeyaan meesha aad u baahan tahay inaad tagto
- Shaqada marba qeyb ayaa la qaban doonaa si loo ilaaliyo marin u helidda inta u dhaxaysa 130 Racecourse Road iyo albaabka laga galo Racecourse Road

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: [homes.vic.gov.au/information-in-your-language](https://homes.vic.gov.au/information-in-your-language)

Waxaa oggolaatay oo daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Guryaha Victoria, bisha Maajo 2026. (HV013126). Waxaa daabacay Finsbury Green, Melbourne Victoria, 3000.

### Maxaa ka socda 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road

- Di yaarinta goobta iyo in calaamadaha meel kasta lagu dhajiyo si loo xaqiijiyo badbaadada
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Howlo shaqo ayaa waxay ka socdaan gudaha dhismayaalka si amaana looga dhigo
- Xoogaa howlo qodis ah oo lagu baarayo agabka shubka ah ee guryaha banaan iyo jaranjarooyinka qaarkood
- Guryaha la faaruqiyay ayaa waxaa laga saarayaa armaajooyinka, waxyaabaha dhulka saaran iyo waxyaabo kale oo guryaha kujira
- Dib-u-warshadaynta qalabka korontada haddii ay taasi macquul tahay

Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

**Isniinta ilaa Jimcaha** inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da galabnimo

**Sabtiyada** 9-ka subaxnimo ilaa 3-da galabnimo

Mararka qaar waxaa loo baahan doonaa fasax laga heysto golaha deegaanka si howlaha shaqo looga qabto saacadaha ka baxsan xilliyadaas balse waanu la socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee deegaankooda:

☎ 1300 360 462

✉ [ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au](mailto:ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au)

Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

✉ [enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au)

**h v homes victoria**

**DHISMAHA GURYAHA EE WEYN**

## Flemington

Wixii ku soo kordhay Bulshada



### Flemington waxaa laga hirgelinayaa guryo ka tiro badan kana tayo fiican kuwii hore

Waxaan ku jirnaa marxaladda qorsheynta si aan u hirgalino in ka badan 800 oo guri oo guryo cusub ah iyo goobo bulsho oo isku dhafan oo laga hirgalin doono Flemington

### La-tashiyada ayaa hada furan

Arag qorshayaasha qabyada ah nala wadaag ra'yigaaga ugu dambeyn Axadda 7-da bisha Juun

### Waxaan idiin soo bandhigaynaa Beerta/barxada Murnalung

5,000 sqm mitir oo dhul cagaaran ah kaas oo loogu talagalay dadweynaha lagana hirgalinayo Flemington

Homes Victoria waxay qireysaa in dadka Aborijinoorka iyo Torres Strait Islander ah ay yihiin dadkii asal ahaan dhulkan lahaa waxayna u mahadcelinayaan isla markaasna xushmad badan u hayaan Odayaashooda, kuwii hore u noolaa iyo kuwa hadda noolba.

**More Homes For Victorians**

**VICTORIA**  
State Government

## Isbeddelka dhisme laga hirgelin doono xaafada Flemington ayaa wali sii socda

**Qorsheynta ayaa ka bilaabatay degmada Flemington si markaas loo qaaddo tallaabada xigta ee lagu dhisayo guryo ka tiro badan intii hore iyo meelo loogu talagalay bulshada, dukaamo iyo adeegyo loogu talagalay dad badan oo reer Victoria ah.**

Mashruuca weyn ee dhismaha ayaa Flemington horey uga hirgaliyay boqolaal guri oo cusub, sidoo kalena in ka badan 800 oo guri oo cusub ayaa loo qorsheeyay marxaladdan xigta.

Naqshadaha qabyada ah waxay si toos ah uga jawaabaysaa talooyinkii ay soo gudbiyeen dadka deegaanka iyo bulshada intii lagu guda jiray aragti is weydaarsiga. Waxaa qeyb ka ah guryo tayo leh oo korontadana dhaqaaleynaya oo leh ilaa shan qol oo jiif ah si ay u taageeraan qoysaska kala duwan. Waxaa sidoo kale loo heli karaa dadka deegaanka ee doonaya inay sii deganaadaan xaafada inta aan ka dayactireyno sarihii dhaadheeraa ee hore.

Naqshadaha la soo bandhigay, mid walba waxay leedahay meel ku taal dabaqa ugu

### Marxaladda koowaad ee dib-u-cusbooneysiinta



**Victoria Street**  
359 guri oo guryo cusub ah iyo meelo cusub oo bulshada loogu talagalay  
oo la dhammaystirayo 2023

### Marxaladda labaad ee dib-u-cusbooneysiinta



**Holland Court**  
286 guri oo guryo cusub ah iyo meelo cusub oo bulshada loogu talagalay  
ayaa la filayaa in la dhameystiro dhamaadka sanadka 2026

### La-tashiyada ayaa hada furan

Eeg qorshooyinka qabyada ah ee loogu talagalay in ka badan 800 oo guri oo cusub iyo goobo bulsho oo badan oo siyaabo kala duwan loo isticmaali karo.



Wax badan ka baro mashruuca, eeg taariikhaha iyo xilliyada la qaban doono kulamada macluumaadka bulshada ama si toos ah online ka noogu soo gudbi ra'yigaaga. Booqo <https://engage.vic.gov.au/racecourse-road-flemington-housing> ama iskaan koodka QR.

## Marxaladda xigta ee cusboonaysiinta



**Dhismaha Racecourse Road**

- Meel ay dadka goobta degan ku nasan karaan oo ku taal dabaqa ugu sarreeya
- Meelo dhir leh oo la isugu imaan karo laguna nasan karo
- Meelaha la wadaago ee koritaanka



**Barxada Murnalung**

- Beer cusub oo dhulka ay ku fadhiso uu dhan yahay 5000 sqm ah ayaa la furayaa bartamaha 2026



**Dhismaha Debneys Park**

- In ka badan 400 oo guryo cusub oo guryo bulsho/dowlad ah cabbirkooduna kala duwan yahay kana kooban ilaa 5 qol oo jiif ah
- Saddex qol oo qolal bulsho ah loona isticmaali karo siyaabo kala duwan oo ay kujiraan goob ay geli karto ilaa 100 qofood
- Xalinta guryaha kirada loogu jiro oo isla goobta ah
- Baarkinno baabuur iyo meelo baskiilada la dhigan karo
- Meelo loogu talagalay dukaamo iyo adeegyo oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka



**Dhismaha Racecourse Road**

- In ka badan 400 oo guri la kireysan karo oo casri ah isla markaasna korontada dhaqaaleynaya oo si toos ah wax uga qabanaya baahiyaha guryaha ee Victoria ka jira
- Cabirro kala duwan oo ilaa 4 qol oo jiif ah
- Baarkinada baabuurta la dhigto iyo meelo baaskiillada la dhigan karo oo loogu talagalay dadka guryaha degan iyo sidoo kale meelo banaan oo baarkinno ah oo loogu talagalay dukaan weyn oo mustaqbalka la dhisi doono
- Dukaamo leh meelo banaan oo wadooyinka la eg, kafateeriyo iyo adeegyada oo ay ku jiraan meel bannaan oo loogu talagalay in laga dhigo supermarket laga dhisayo Racecourse Road



**Dhismaha Debneys Park**

- Meelo banaan oo dabaqa ugu koreeya ah oo loogu talagalay isu imaatinka iyo nasashada
- Dariiqyo iyo meelo dhir leh oo ay dadku wadaagi karaan
- Meel fadhi leh oo ay dadka meesha degan ku nasan karaan